# Tillaabooyinkii soo gelidda waddanka tartiib-tartiib ayaa loo qaadayaa

**"Maalin caadi ah oo heegan sare leh", waxay dawladdu ku qaadaysaa tillaabooyinkii soo gelidda waddanka. Saddex weji ayaa loo qaadayaa, midka koowaad na wuxuu billaabmayaa sabtida 25-ka sibteembar, saacadda 16.**

Laga billaabo wakhtigaas waxaa in ay Norway soo geli karaan loo oggolaanayaa dhammaan dadka u dhashay waddammada EØS, oo ay ku jiraan muwaaddiniinta waddammada kale ee deggan EØS. Waxaa sidaas la mid ah dadka ku nool Ingiriiska iyo Iswiisarland. Waxaan sidoo kale u oggolaanaynaa in ay Norway soo galaan dhammaan ajnebiga ku nool waddammada loogu yeero waddammada basaliga ah. Waa waddammo ka baxsan aagga EØS/Schengen oo uu Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) u arko in xayiraadaha laga debcin karo.

- Muddo dheer ayay tillaabooyin adag xudduudaha ka jireen. Taas oo muhiim u ahayd sidii looga hortegi lahaa cudurka dibedda ka imaanaya. Hadda marka aan u gudbayno maalin caadi ah, waxay dawladdu qorshaynaysaa in xayiraadaha soo gelidda waddanka loo qaado si tartiib-tartiib ah. Waxay taasi dhici doontaa ayada oo xaaladda si wanaagsan loola socdo, ayay tiri Monica Mæland (H) oo ah wasiirka caddaaladda- iyo heeganka.

Wejiga koowaad ee debcinta xayiraadaha soo gelidda waddanka wuxuu billaabmayaa sabtida 25-ka sibteembar, saacadda 16. Wejiga xiga waxaa sida qorshuhu yahay qiimayn lagu samayn doonaa qaybta danbe ee bisha oktoobar.

**Wax-ka-beddellada wejiga 1-aad**

Wax-ka-beddellada soo socda ayaa dhaqangelaya 25-ka sibteembar 2021 - saacadda16:

Soo gelidda waddanka

- Xayiraadaha soo gelidda waddanka, waa xaddidaadihii ku saabsanaa dadka loo oggol yahay in ay Norway soo galaan, waa laga qaadayaa waddammada EØS/Schengen iyo waddammada basaliga ah. Taas oo micnaheedu yahay in dadka u dhashay EØS, iyo muwaaddiniinta waddammada kale ee deggan aagga EØS iyo dadka deggan Ingiriiska iyo Iswiisarland in ay Norway soo geli karaan. Waxaa sidoo kale xayiraadaha soo gelidda waddanka laga qaadayaa dadka deggan waddammada basaliga ah, waa waddammo ka baxsan EØS/Schengen oo uu FHI u arko in tillaabooyinka loo debcin karo.
- Ilaa iyo hadda waxaa la oggol yahay in waddanka laga soo galo 35-ta barood ee ah xudduudaha loo oggol yahay in ay waddanka ka soo galaan dadka aan sida gaarka ah wax looga dhaafin. Baraha xudduudaha ee xiran waxaa dib loo furi doonaa marka ay degmada xadku tijaabo qaadi karto, islamarkaana warbixin wanaagsan loo diyaariyo dadka safarka ah.

- Booliisku waxay muhiimadda koowaad siin doonaan in ay baaraan dadka ka imaanaya meelaha cudurku ku badan yahay. Muhiimad badan la siin maayo dadka ka imaanaya meelaha cudurku ku yar yahay, laakiin waxaa laga qaadi doonaa koontaroollo goosgoos ah.

Karantiilka iyo tijaabo-qaadista:

- Karantiilka soo gelidda waddanka waa laga dhaafayaa dadka ka soo safray aagagga midabka liinta leh. Hadda kaddib waxaa karantiil geli doona marka ay waddanka soo galaan keliya dadka ka yimaada waddammada guduudan, kuwa guduudka tiqda ah, kuwa basaliga ah iyo kuwa midabka dameeriga ah leh (waa waddammada kale ee saddexaad).
- Carruurta ay da'doodu ka yar tahay 18 sano waa laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda waddanka. Waa sii jirayaa waajibka ah in xudduudda tijaabo looga qaado carruurta ka imaanaysa waddammo karantiilku waajib ku yahay. Waxaa kale oo lagu talinayaa in saddex maalmood kaddib tijaabo laga qaado.
- Dadka waaweyn ee ka yimaada meelo karantiilku waajib ku yahay waxay karantiilka soo gelidda waddanka uga bixi karaan tijaabo PCR ah oo cudurka laga waayay taas oo laga qaaday ugu horreyn saddex maalmood kaddib markii ay waddanka yimaadeen. Waajibkii ahaa in tijaabo PCR ah la iska qaado toddoba maalin kaddib marka waddanka la yimaado waa la joojiyay.
- Hoteelkii karantiilka ee shardiga ahaa waa la joojiyay, laakiin weli wuu u sii jirayaa dadka aan haysan meel kale oo ku habboon in karantiil lagu galo. Hadda marka xeerarkaan cusub la soo rogo dadka ku jira hoteel karantiil, haddii ay doonayaan halkaas way ku dhammaysan karaan karantiilkooda.
- Shuruuddii ahayd in tijaabo koroone layska qaado ka hor intaan Norway la imaan waa la joojiyay.
- Shuruuddii ahayd dadka ka imaanaya aagagga cagaaran iyo kuwa midabka liinta leh in tijaabo laga qaado marka ay xudduudda ka soo tallaabayaan/waddanka yimaadaan waa la joojiyay. Waa sii jiraysaa shuruuddii tijaabada ee dadka ka imaanaya meelaha karantiilku waajibku ku yahay.
- Dhammaan dadka qaatay tallaal buuxa oo haysta caddayn shaqaynaysa waa laga dhaafayaa karantiil iyo tijaabo-qaadis.

**Wax-ka-beddellada wejiga 2-aad**

Wejiga 2-aad waxay dawladdu qorshaynaysaa in xaddidaadda soo gelidda waddanka laga dhaafo dhammaan waddammada ku jira liiska waddammada saddexaad ee Midowga Yurub (EU). Waajibka karantiilka waa la qaadayaa, marka hore waxaa laga qaadayaa waddammada EØS/Schengen iyo kuwa midabka basaliga, markaas kaddibna dhammaan kuwa ku jira liiska waddammada saddexaad ee EU. Waxaa isla sidaas oo kale loo fududaynayaa tijaabo-qaadkii xudduudka iyo shuruuddii is-diiwaangelidda marka waddanka la soo gelayo.

**Wax-ka-beddellada wejiga 3-aad**

Wejiga 3-aad waxaa lagu eegayaa xaddidaadaha lagu xiri doono soo gelidda Norway iyo xeerarka karantiilka ee kuwaas la socon doona. Awoodaha la bixiyo way sii jirayaan. Shuruuddii tijaabada marka waddanka la yimaado iyo tijaabadii PCR waxaa lagu qaaday

wejigii 3-aad, laakiin waa la soo celin karaa haddii loo baahdo. Heegan koontarool ayaa ka jiri doona gudaha xudduudaha Schengen.

### Xarumaha tijaabada si tartiib-tartiib ah ayaa loo dhimi doonaa

Dawladdu waxay qorshaynaysaa in xarumaha tijaabada si tartiib-tartiib ah saddex weji loogu dhimo. Wejiga 1-aad waxaa sii jiri doona xarumaha tijaabada ee baraha waddanka dibedda laga soo galo ee Svinesund iyo Storskog. Xarumaha tijaabada ee kale degmooyinku ayagaa go'aansanaya in tijaabo-qaadistu ka dhacayso xudduudda iyo in ay ka dhacayso degmada xudduuddu ku taallo. Wejiga 2-aad waxaa sii jiri doona xarumaha tijaabada ee Gardermoen, Svinesund iyo Storskog, xarumaha kale ee tijaabadana waa la xirayaa – dadka safarka ah ee xudduudaha kale waddanka ka soo galana waxay tijaabada isaga qaadi doonaan degmada ay u socdaan. Wejiga 3-aad tijaabo laguma qaadi doono xudduudka, laakiin waxay degmooyinku yeelanayaan heegan ay maalmo yar gudahood ku billaabi karaan in ay tijaabo qaadaan.

### Koontaroolka xudduudaha si tartiib-tartiib ah ayaa loo dhimi doonaa

Dawladdu waxay qorshaynaysaa in saddex weji tartiib-tartiib loogu dhimo koontaroolka xudduudaha. Ilaa iyo hadda dadka aan sida gaarka ah wax looga dhaafin waxay waddanka ka soo geli karaan 35-ta barood ee xudduudaha la aqoonsan yahay. Baraha xudduudaha ee xiran waxaa dib loo furi doonaa marka tijaabo-qaadista la diyaariyo. Markaa baraha xudduudaha ee la aqoonsan yahay waxay kordhi doonaan marka degmooyinka lagu diyaariyo goobo tijaabo lagu qaado. Boolisku waxay muhiimadda koowaad siin doonaan koontaroolka dadka ka imaanaya meelaha cudurku ku badan yahay. Muhiimad badan lama siin doono dadka ka imaanaya meelaha uu cudurku ku yar yahay, laakiin waxaa laga qaadi doonaa koontaroollo goosgoos ah. Dib u furidda baraha xudduudaha ee xiran iyo joojinta koontaroolka xudduudaha waddamada Schengen dhexdooda si joogto ah ayaa qiimayn loogu samayn doonaa, laakiin waxay ku xirnaan doontaa waxyaalaha ay ka midka yihiin awoodda tijaabo-qaadista ee degmada. Wejiga 2-aad gudaha xudduudka Schengen waxay boolisku samayn doonaan koontoroollo goosgoos ah oo ku salaysan xog la hayo. Baraha xudduudaha oo dhan waddanka waa laga soo geli karaa. Dibedda xudduudka Schengen waxaa ka jiri doona koontarool xudduud oo caadi ah oo ay la socoto wargelinta xeerarka ka hortagga cudurrada ee markaas jira. Wejiga 3-aad wuxuu booliisku yeelanayaa heegan uu maalmo yar gudahood dib ugu billaabi karo koontaroolkii gudaha xudduudka Schengen.

### Xarunta koontaroolka heer qaran si tartiib-tartiib ah ayaa loo xiri doonaa

Xarunta koontaroolka heer qaran ee dadka waddanka soo gelaya tartiib-tartiib ayaa shaqaalaheeda loo dhimayaa, waxayna hawlaha koontaroolka iyo gudbinta warbixinnada joojinaysaa 31.oktoober. Wixii intaas ka danbeeya waxaa la samaynayaa shaqaale dadka safarka ah SMS ugu diri kara warbixinta waajibka karantiilka- iyo tijaabada. Ilaa dhammaadka 2021-ka waxaa jiri doona heegan dib loogu furi karo xarunta koontaroolka. In heegankaas la sii wadayo waxaa la qiimayn doonaa dhammaadka 2021-ka.

### Wax-ka-beddellada Svalbard iyo doomaha dalxiiska Svalbard

Waa sii jireysaa shuruuddii ahayd in karantiilka soo gelidda waddanka lagu galo berriga ka hor intaan la sii wadan safarka lagu tagayo Svalbard. Dawladdu waa joojinaysaa shuruuddii ahayd in la keeno tijaabo koroone oo qofka cudurka laga waayay ka hor inta aan Svalbard loo safrin. Waxaa kale oo la joojinayaa shuruudihii lagu xiray safarrada iyo xaddidaaddii tirada dadka joogi kara hoteellada iyo meelaha kale ee la cawa-baryo ee Svalbard. Caadi ahaan waa la joojinayaa shuruudihii doomaha dalxiiska ee Svalbard, laakiin weli xaddidaad ayaa jiri doonta marka doomuhu ku xiranayaan berriga Svalbard – oo waa in doontu ku laabato xeebtii ay ka soo safartay haddii dadka saaran cudurka looga shakiyo ama laga

helaba. Wax-ka-beddeladaan waxay dhaqangelayaan 25-ka sibteembar – saacadda 16.00. Waa sii jiraysaa mamnuuciddii ku-meelgaar ahayd ee lagu mamnuucayay duulimaadyada gaarka ah (charter) ee Svalbard lagu tagayey.

**Wax-ka-beddello doomaha dalxiiska ee xeebaha Norway**
Dawladdu way joojinaysaa inta badan shuruudihii doomaha dalxiiska ee xeebaha Norway. Waxaa la sii wadayaa xaddidaadihii ku xirashada berriga. Waa la sii wadayaa waajibkii karantiilka ee laga dhaafay shaqaalaha doomaha dalxiiska, laakiin waxaa jiri doona wax-ka-beddello yar oo la socda wax-ka-beddellada guud ee lagu sameeyay xeerarka soo gelidda waddanka. Wax-ka-beddeladaan waxay dhaqangelayaan 25-ka sibteembar – saacadda 16.00.

**Hay'adda kormeerka goobaha shaqada ayaa weli horey u sii oggolaan doonta goobta la joogayo**
Shaqaalaha- iyo qandaraasleyda ajnebiga ah ee in ay waddanka soo galaan loogu oggolaaday nidaamka codsiga ku salaysan ee ay maammulaan Agaasinka Socdaalka Badda iyo Agaasinka Beeraha, weli waxay karantiilka soo gelidda waddanka ku gelayaan goob ku habboon oo ay aqoonsatay Hay'adda kormeerka goobaha shaqada ama hoteel karantiil. Wejiga koowaad ee debcinta tillaabooyinka soo gelidda waddanka waxaa sii jireysa shuruuddii ahayd in Hay'adda kormeerka goobaha shaqadu horey u sii aqoonsato in goobta la joogayo tahay mid joogista ku habboon.

| **Xeerarkii soo gelidda waddanka iyo tillaabooyinkii waxaa tartiib-tartiib loogu qaadayaa "Maalin caadi ah ee heegan sare leh"** | | | |
|---|---|---|---|
| **Xayiraad/talo/tillaabo** | **Wejiga 1-aad** | **Wejiga 2-aad** | **Wejiga 3-aad** |
| Talooyinka safarka ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda (UD) | Waxaa la joojinayaa 1-da oktoober. Waxaa lagu beddelayaa talooyin safar oo waddamo khaas ah khuseeya. | | |
| Xayiraadaha soo gelidda waddanka (cidda loo oggol yahay in ay waddanka soo gasho) | Waa laga qaadayaa aagga EØS/Schengen iyo waddammada midabka basaliga ah. | Waa laga qaadayaa dhammaan waddammada ku jira liiska waddammada saddexaad ee EU. | Gadaal ayaa qiimayn looga samayn doonaa. |
| Waajibka karantiilka | Karantiilka soo gelidda waddanka waa laga dhaafayaa dadka ka soo safray waddammada midabka liinta. | Waxaa marka hore laga dhaafayaa dadka ka imaanaya waddammada EØS/Schengen iyo kuwa midabka basaliga. Qiimayn | Gadaal ayaa qiimayn looga samayn doonaa. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | Karantiilka soo gelidda waddanka waa laga dhaafayaa carruurta ka yar 18 sano, laakiin waxaa la sii wadayaa waajibkii in xudduudda tijaabo looga qaado – waxaana lagu taliyaa in saddex maalmood kaddib tijaabo laga qaado.<br><br>Dadka waaweyn ee ka soo safray waddammada uu karantiilku waajibka ku yahay way ka bixi karaan karantiilka haddii tijaabo PCR ah oo cudurka laga waayay laga qaado ugu horreyn saddex maalmood kaddib markii ay waddanka yimaadeen. | cusub kaddib na waxaa laga dhaafayaa dhammaan waddammada ku jira liiska waddammada saddexaad ee EU.<br><br>Haddii aan laga dhaafin dhammaan waddammada ku jira liiska waddammada saddexaad ee EU, waxaa markaas la eegayaa in karantiilka laga dhaafi karo dadka wata caddayn tallaal oo aan la xaqiijin karin.<br><br>Waddammada ay ka jirto xaalad cudur oo welwel leh waxaa mar kale lagu soo rogi karaa karantiilka safarka soo gelidda waddanka. | |
| Hoteelka karantiilka | Wuxuu ilaa hadda u sii jirayaa dadka aan haysan meel ku habboon oo ay karantiil ku galaan. | | Waa la yaraynayaa. |
| Tijaabo-qaad intaan waddanka la imaan ka hor | Waa la joojinayaa. | | |
| Tijaabo-qaado marka waddanka la yimaado kaddib | Waa laga dhaafayaa dadka ka soo safray waddammada cagaarka ah iyo kuwa midabka liinta. Waxaa ku sii jiraya dadka ka imaanaya waddammada karantiilku waajibka ku yahay. | Waxaa si tartiib-tartiib ah loola joojinayaa waajibka karantiilka. Haddii loo baahdo mar kale ayaa shuruudda tijaabada lagu soo rogi karaa waddammada ay ka jirto xaalad cudur oo welwel leh. | |

| | | | |
|---|---|---|---|
| Tijaabada PCR marka waddanka la yimaado kaddib | Tijaabo PCR ah oo qofku iskiis u dooranayo 3 maalin kaddib markii laga yimid waddan karantiilku waajib ku yahay.<br><br>Waa la joojinayaa tijaabo PCR oo khasab ah toddoba maalin kaddib markii waddanka la soo galay. | Waxaa si tartiib-tartiib ah loola joojinayaa waajibka karantiilka. Haddii loo baahdo mar kale ayaa shuruudda tijaabada lagu soo rogi karaa waddammada ay ka jirto xaalad cudur oo welwel leh. | |
| Diiwaangelinta soo gelidda waddanka | Waxaa lagu xirayaa karantiilka iyo tijaabada. | Waxaa si tartiib-tartiib ah loola joojinayaa waajibka karantiilka. | Heegan sare loogu qaadi karo. |
| Xarunta koontaroolka dadka waddanka soo gelaya | Shaqaalaha ayaa la dhimayaa. | La-talinta telefoonka lagu baxsho waa la joojinayaa laga billaabo 31.10. Waxaa la sii wadi doonaa in SMS warbixin loogu diro dadka uu karantiilku waajibka ku yahay. | Heegan sare loogu qaadi karo. |
| Shahaadada koroonaha ee marka waddanka la soo gelayo | Waa la isticmaalayaa. | | Sida uu dhigayo xeer-hoosaadka EU waddamadu dadka waa ka dalbi karaan ilaa inta nidaamkan laga joojinayo. |
| Koontaroolka xudduudda | Koontaroolka xudduudda gudaha xadka Schengen waxaa xoogga lagu saarayaa meelaha cudurku ku badan yahay. Dadka kale ee safarka ah mid mid ayaa la koontarooli doonaa. Waxaa laga soo gudbi karaa keliya 35-ka barood ee | Gudaha xudduudka Schengen waxay boolisku ka samayn doonaan koontoroollo goosgoos ah oo ku salaysan xog la hayo. Baraha xudduudaha oo dhan waddanka waa laga soo geli | Heegan dib loogu billaabi karo koontaroolka xudduudka gudaha ee Schengen. |

| | | | |
|---|---|---|---|
| | xuduudaha la aqoonsan yahay.<br><br>Dibedda xudduudka Schengen waxaa ka jiri doona koontarool xudduud oo caadi ah oo ay la socoto wargelinta xeerarka ka hortagga cudurrada ee markaas jira. | karaa. Dibedda xudduudka Schengen waxaa ka jiri doona koontarool xudduud oo caadi ah oo ay la socoto wargelinta xeerarka ka hortagga cudurrada ee markaas jira. | |

Macluumaadka wejiga 2-aad iyo kuwa midka 3-aad waa ku-meelgaar oo waxaa dhici karta in wax laga beddelo.